Afar Dhagax Dhexdood !! (Sheeko Gaaban)

WQ: Cabdullaahi M. Cawsey

Waqtigii loogu tala galey in doodaha ay billowdaan waa la dhaafay. Dad ka badan tiradii la filayay ayaa goobta yimid. Waxaa golaha loo fadhiyaa in la dhageysto dood lagu soo bandhigayo aragtiyaha waayahan danbe laga daba dhacay ee looga waramo sooyaalka iyo siyaasadda casriga ah ee Soomaalida. Rag afmaal ah oo laga soo kala xuley kooxaha kala duwan ee isku haysta fasiraadaha laga bixiyo taxanaha taariikhda iyo siyaasadda Soomaalida ayaa madashada lagu martiqaadey si loo dhagaysto waxyaabaha ay bulshada ku biirin karaan. Nin walba waxaa loo qabtay Saddex daqiiqo iyo Saddex ilbiriqsi si waqtiga loo ilaaliyo. Ciinwaanka doodu waa: danta dadka Soomaaliyeed.

Madasha fagaarahan ka dhacayo waa goob ka yara durugsan tuulada mustaqbalka noqon doonta caasimadda Soomaaliya. Kuraas salka la saaro madasha kama muuqdaan. Inta badan dadka goobta yimid, waxay si qalbi furnaan ah dabada ugu hayaan dhulka. Waxaa dhanka bari ee madashada ka soo jeeda odayaashii tuulada. Meel aan ka fogeen halka odayaasha ay fadhiyaan, waxaa ka muuqda Xaddiyo oo waayahan danbe u xuubsiibatay Islaan xusul baruur ah ka dib marki xikmad badan iyo xeeldheeri durugsan ay ka dhaxashay madax falluuqa Soomaalida. Qadarin iyo maamuus Islaanta loo muujiniyo darteed, waxaa lagu sharfay in fadhi ay ka dhigato gasacad maran oo waa dhexdaas ah caano boore laga cabay.

Xaddiyo madasha qaab cago jiid ah ayay ku timid ka dib markii duq Xandulle oo maalmo ka hor qaab qudbo siro ah isku guursadeen uu ku qalqaaliyay ka soo qayb galka madasha dooda maanta lagu qabanayo. Oday Xandulle ujeedo kale oo sir ah ayuu ka lahaa martiqaadka marwadiisa cusub ee duq Xaddiyo.

Habeen dhexdaas ah mar uu Xandulle la haasawayay duq Xaddiyo ayuu wuxuu maqlay ayadoo leh“ kama helo ragga af-garroocyada ah ee hadalka ku mergada ee aan heli karin hadalka miiddiisa. Hadalkaas hoos ka tuurka ah wuxuu oday Xandulle ka qaadday buufis! Haddaba, wuxuu rabay inuu tuso islaanta isbaarada u dhigatay qalbigiisa,heerka uu ka gaaray codkarnimada waayo Xandulle waxaa maanta loo xilsaaray inuu noqodo xiriiriyaha u dhaxeeya marti sharafta iyo ragga qudbooyinka iyo doodaha ka soo jeedin doona shirka.

“Aan is dhageysano walaalayaal, doodihii baa inoo bilaabanaya, haddana waxaan u yeeraynaa ninkaas odayga ah ee dhexda fadhiya.” Sidaa waxaa yiri Xandulle oo codkiisa xabeeb iyo is xariifin laga dareemayo.

Odaygii dhexda fadhiyay ayaa soo dhaqaaqay. Muuqaal ahaan waa nin gaaban oo ladnaan gadaal ka gaar ah ay ka muuqato, garka waxaa u marsan cillaan cusub oo laga keenay dalka Cumaan. Wuxuu ku labisan yahay futashaari afar jeeble ah iyo koofiyad barawaani ah. Midabkiisu waa madow la moodo muufo si xun loo dubay oo kale!

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

Qudbaddii uu shirka ugu talo galay wuxuu ku bilaabay hadal sidan ahaa:

(…Dadka Soomaaliyeed waa umad kuligood isku ah xigto iyo ehel. Waa dad ay ka dhaxeeyaan dano waaweyn iyo mustaqbal guud. Waa dad nasiib u helay inay wadaagaan dhaqan soo jireen ah, Af fac weyn, iyo diinta Raxmada badan ee rabi u dooray umadaha cirka ka caleema saaran. Soomaalida oo barwaaqo iyo bashbash ku jirta ayaa waxaa dibada ka soo weeraray cadow guun ah oo damacay in Soomaalida la gumeeyo.

Rabi baa ku mahadsane, dadka Soomaaliyeed waxaa cadowgaas guunka ah ka difaacay halyeeyo waaweyn oo taariikhda ka galay baal dahab ah. Nimankii faduusha iyo gardarada gaalada jilbaha u dhigay ayagoo jihaadaya waxaa ka mid ahaa Sayidinaa Muxamed Cabdulle Xassan iyo nin lagu muransanyahay Soomaalinimadiisa oo magaciisa lagu sheegay Axmed Gureey.

Halganka raggaas wuxuu marqaati ka yahay in Soomaalida safka hore kaga jirto muslimiinta gaaladu sida gaarka ah u necebyihiin. Xorriyaddii ka dib, dalka iyo dadka Soomaaliyeed waxaa loo maleegay shirqoolo waaweyn oo lagu damacsanaa in lagu dumiyo qaranimadii la hantay iyo hankii ahaa in qawmiyada Soomaaliyeed ee shanta loo qaybiyay lagu mideeyo maamul qura. Shirqoolka shisheeyaha u qoolay Soomaalida waxaa ka mid ah, in la isku diro qabiilada kala duwan si qabkooda iyo waliba qaranimadooda loo dumiyo.

Wixii nagu dhacay oo dhib ah waxaa sabab u ah shirqoolka shisheeyaha iyo talo xumada kuwa naga midka ah ee shisheeyaha la shaqaysta. Qabyaaladdii la isku dilay ma ahan wax ka yimid qalbiyada Soomaalida ee sida hoose iksu jecel. Tusaale ahaan, qarniyadii hore, qabiilada kala duwan ee Soomaalida ka koobantahay waxaa ka dhaxeeyay walaalnimo saldhig looga dhigay dhiig iyo wada dhalasho. Sidaa daraadeed, dadka Soomaaliyeed ee is dilaya waa inay xasuustaan taariikhda quruxda badan ee ugu kaydsan taxanaha taariikhda, dabadeedna ay ka dawoobaan wixii xumaan iyo xurguf ah ee dhax maray ayagoo noqonaya sidii xalay dhalay oo kale.

Wixii dhib ah oo dhacay waxaa fiican in la iska cafiyo waayo dhibaatada shisheeyaha damacsanyahay ayaa ka weyn midda na dhex taala. Is baabi'intii, bililiqadii, boobkii iyo burburkii Soomaalida ka dhex dhacay waxaa looga bogsan karaa afar faataxo oo bun iyo canbuulo lagu barakeeyay! Haddaba aynu gacmaha is qabsano, anagoo noqonnay dad walaalo ah, dibna ugu laabano caasimadii hore ee Soomaaliya Muqdisho anagoo dhisayna dawlad dhexe oo u babac dhigi karta cadowga dibada iyo doqomada gudaha! Soomaaliya ha noolaato. Waad mahadsantihiin walaalayaal.")

"Aad buu u mahadsanyahay odayga sida kooban ee hordhaca dooddiisa ugu soo bandhigay, haddana waxaan u yeeraynaa siyaasisga geeska bixid fadhiya ee ku falaadaya faylasha " sidaa waxaa yiri Xanuddule oo isha bidix ku eegaya Xaddiyo.

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

Siyaasiga soo istaagay waa nin da' dhexaad ah oo ku labisan suud madow iyo xarigga luqunta laga laalaadiyo oo midabkiisu yahay gaduud xigeen la moodo ciida gobolka galgaduud oo kale. Daqar weyn ayaa ka muuqda daankiisa bidix, wuxuuna u eg egyahay Canjeexii atooraha ka ahaa filimada Hindiga. Waa siyaasi qurbaha ka yimid oo ka mid ahaa saraakiishii ciidamada ee ka qaxay qaxarkii iyo qalalaasihii dalka ka dhacay. Haddii si fiican loogui fiirsado wajigiisa, waxaa si fudud lagu fahmayaa inuu ka mid ahaa geeljirayaashii kacaanku askar ahaanta uga soo qortay baadiyaha fog ee Soomaaliya si ay uga mid noqdaan ciidamadii lagu cadaadin jiray shacacbka. Sargaalka siyaasiga noqday dooddiisii wuxuu ku bilaabay sidan:

(…….Dawladnimadii Soomaali u dhisnayd waxaa dumiyay qabaa'il sheegay in ay ku xanaaqeen maamulkii jiray markaas. Qabiiladaas xanaaqay, dumintii dawladnimada kuma aysan ekaanine, waxay guda galeen bililiqo iyo barakacin baahsan oo lagu beegsaday beelaha qaar.

Halkaas waxaa ka bilowday dagaaladii sokeeyaha oo Soomaali oo dhan ka dhigay qawmiyad lagu maadsado qarnigan la joogo. Cadaawada iyo colaada maanta dhex taala Soomaali waa mid caalamka ka cajabay.

Su'aasha sixirka ka daran ee dunida ku daashay waxay tahay: war dadkan haddii ay dhaqan, dhiig iyo waliba dhalasho wadaagaan, maxay tahay sababta ka danbaysa in sidan waalida ah isku dilaan. Odaygii iga horeeray wuxuu ku dooday, Soomaalida waa dad walaalo ah oo la isku diray. Hadalkaas gar ma ahan waayo cid isku diri karta ma jirto dad aan diyaar u ahayn inay isdilaan. Kuwa horseedka ka ah bililiqada iyo boobka ka socda Soomaaliya ayaa dadka ku wacdiya qaranimo iyo walaalnimo aan jirin.

Haddaba waa laga fiicanyahay in indhaha xanjo la marsado oo xaqiiqda laga leex leexdo. Xumaanta Soomaali dhex taala waxaa xal u noqon kara in xaqiiqda laga sheego wixii dhacay iyo sida ay u dhaceen, waa haddii dan laga leeyahay in dagalaada iyo dabka socda la damiyo.

Xalku wuxuu ku jiraa in qolo walba qaladkii ay gashay qirato. In qabiiladii is dilay qaab qasab ah la iskugu soo qoor qabto ayadoon si dhab loo heeshiin, dabadeedna la dhiso dawladnimo been ah oo dunida lagu dawarsado baa dadka qaar maanta dan moodeen. Danta iyo nabada Soomaalida waxay ku jirtaa in qabiil walba iyo qolo kasta deegaankeeda iimaansato, dabadeedna maamul iyo kala danbayn u gaar ah sameystaan. Qabiilkii Soomaali ka go'aya waa in la sagootiyo, qabiilada wali aan ka quusan dawladnimadii la isku dilay waa in loo dhiso dawlad federal ah si looga bogsado buufiska jira !. Wixii intaa ka soo hara waa hala is dilo ilaa qiyaamaha laga gaarayo. Waad mahadsantihiin...)

Waqti ka yar daqiiqadihii loogu talo galay ayuu siyaasiga ku soo koobay doodiisa, Hadalkiina waxaa qaatay xiriiriyaha madasha, mudane Xandulle asagoo leh."

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

“Siyaasiga waa mahdsanyahay, haddana waxaan u yeerayaa ninkaas aqoonyahanka ah ee midig ka soo xiga dhanka Xaddiyo ay fadhiso”

Aqoonyahanka loo yeeray waa nin bar yar oo bidaar waa hore bilaabatay ku leh bartamaha madaxiisa. Dhafar, iyo qaadiyiro ayaa ka muuqda dhafoorkiisa. Waxaa laga yaabaa inuu ka mid yahay aqoonyahanada muqayiliinta ah ee busaarada iyo shaqo la’aanta jirta darteed marfishyada lagu qayilo kaga dhuunta mugdiga nolosha. Waji furnaan iyo farxad aan ka muuqanin raggii dooda kaga horeeyay ayuu mararka qaar muujinayaa. Mar-mar waxaa la maqlayaa aqoonyahanka oo ku dhufanaya qosol gariir ka dhigan calaamada ay caanka ku yihiin nimanka qaba naagaha qaylada badan ee qumayooyinka ah. Aqoonyahanka wuxuu doodiisi ku bilaabay sidan:

“Marka taariikhda cusub iyo midda fog la gorfeeyo, Soomaalida iskama xigaan qawmiyadaha kale ee kula nool geeska Afrika. Waxa kaliya ee Soomaalidu wadaagaan waa af- Soomaaliga oo qaabab kala duwan loogu hadlo iyo diinta islaamka oo waa dhexdaas ah dhulalka carabta la inooga soo xawilay.
Sidaa daraadeed dadka Soomaaliyeed in dhalasho iyo dhiig ay wadaagaan dood cilmiyeed baa ka taagan!

Sida taariikhda ku xusan, Soomaalidu waxay ahaayeen qabaa’il kala madax banaan oo qolo walba gaar u dagantahay. Qarniyo badan ayaa qabiilada Soomaalidu lahaayeen xiriir ku dhisan jaceyl iyo naceyb wada socda. Colaado iyo dagaal joogta ah ayaa qabiilada Soomaalida u dhexeeyay waligood. Colaadaha iyo is dilka beelaha Soomaaliyeed dhex yaala asal ahaan wuxuu ka soo jeedaa murano ka dhashey dhul daaqsiinka xooladhaqatu hadba ku guurguuraan si afarta meesi (Ariga, Lo’da Geela iyo Idaha) loogu baadigoobo baad iyo biyo.

Qabiilada Soomaaliyeed oo hadba dhan isku cayrsada sida dugaagii baa gumaystihii dalku yimid. Markaas baa ugu horreeysay magac iyo maamul Soomaali ku midowdo ka dib markii saancadaalahii soo duulay dawladnimo carsi ah dalka keenay. Kolkii uu gumeystaha ka huleelay dalka, waa tii qaranimadii la dhaxlay loo rogay bartilmaameed hadba beelaha isku cayrsadaan oo maalinba qabiilkii xoog leh qadada iyo qayilaada ka dabaraan.

Kufsiga gabdhaha iyo dhicida geela ayaa ah dhaqanka guud ee Soomaalidu wadaagto. Sidoo kale Soomaalidu waxay wadaagaan basar xumo ay ka dhaxleen dhaqan Carbeedkii ku soo dhex dhuuntay diinta Islaamka kolkii ay soo gaartay geeska Afrika. Basar xumada laga bartay dhaqanka Carabta waxaa ka mid ah caqliga oo lala coloobo dabadeedna la iska caashaqo caadifadaha kala duwan ee Carabtu caanka ku yihiin sida nacasnimo iyo naceyb wada socda.

Sababta dadka Soomaaliyeed dirqi ugu noolyihiin qarnigan ilbaxnimada iyo hormarka la higsanayo ayaa ah dhaqanka liita ee Soomaalidu wadagaan ee kor aan ku soo xusnay iyo basar xumada laga bartay Carabta.

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

Haddaba Soomaalidu caymo iyo cawil celin ma leeyihiin ayaa dadka qalbiga wanaagsan is weydiin karaan. Inta su'aashaas aan la is weydiinin waxaa ka horreysa su'aal kale oo cilmi ah oo mudan in laga dhul bilaabo. Maxaa ka dhab ah jiritaanka Soomaalinnimada had iyo jeer la maqlo?...."

Hadalka markuu halkaas marinayo aqooyahanka, ayaa waxaa ka soo dhex galay Xandulle oo xasuusinaya in soddon iyo saddex ilbiriqsi uga hareen waqtigii loogu talagey.

"Waa hagaag hadaba, halkaas baynu ku bargoonaynaa dooddii aan ugu soo talo galey shirkan qiimaha badan".. Sidaa waxaa yiri aqoonyahankii oo qosol gariir marklae qac ka siinaya!

"Waxaa la soo gaaray gabagabadii qudbooyinkii hordhaca u ahaa doodaha maanta loo fadhiyo madashan." Xandulle ayaa sidaa ogaysiis ahaan u sheegay, wuxuuna sii raaciyay intaas; " Haddana waxaan u yeerayaa wadaadka kilkilaha ku sita kutubta ee fadhiya dhanka bari ee dhabarka Xaddiyo"

Ilaahay amarkiis, wadaadku muuqaal ahaan waa nin ladan oo dhabarka iyo dhexdaba u buuran. Baruurta ku habsatay bartama calooshiisha waxaa la moodaa muuqaal ahaan buuraha Golis ee taxan dhulka u dhaxeeya waqooyi Galbeed iyo waqooyi Bari ee Soomaaliya. Wadaadku wuxuu ku labisanyahay qamiis cad iyo cimaadad cas oo waqti aan dheerayn hadiyad ahaan ugu soo dhiibiibay saaxiibkii Abuu- Musbaar oo ah shiikh ku nool khaliijka. Burburkii dalka ka hor, wadaadku wuxuu ka mid ahaa dhalinyaradii busaarada iyo camal la'aanta is biirsaday dartood uga cararay Soomaaliya ayagoo u shaxaad doontay dhulalka carabta oo markaas laga helay shidaal. Muddo kadib wuxuu ku soo laabtay dalka asagoo aaminsan in Soomaalidu yihiin duul fadareysan oo u baahan in diinta Islaamka ee saxda ah loogu yeero markale. Qudbaddii wadaadka wuxuu ku bilaabay sidan asagoo ay ka muuqato isku kalsoonaan badan:

" Mahad oo dhan waxaa leh ilaahay oo aaburay dhulka, dadka, soona dajiyay diinta Islaamka. Ilaahay wuxuu aadanaha ka doonayaa inay raacaan jidka toosan ayagoo fulinaya sharciga iyo qawaaniinta loo dajiyay dhulka iyo dadkaba. Mar haddii Dhulka oo dhan ilaahay leeyahay, waxaa danbi ah in xuduudo been ah loo qaybiyo ayadoo isla markaa adoomada ilaahay (dadka) la hoos geenayo dawlado ilaaliya xuduudahaas xaaraanta ah. Dhibaatada ku dhacday Soomaalida waxaa laga dhaxlay garab markii sharciga ilaahay u dagsaday dhulka iyo dadkaba.

Soomaalida sinji ahaan waa Carab. Muran badan kama taagna carabnimada Soomaalida, balse waxaa kaliya oo la'isku haystaa qaabkee Soomaalidu carab ku noqotay. Sida diinteena ku xusan, Soomaalida waxay soo hoos galayaan umadaha cajamta ah ee la Carabeeyay. Sidaa daraadeed, sida kaliya ee Soomaalida iyo

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.

umadaha la carabeeyay diinta Islaamka ku baran karaan waa inay u nacamleeyaan ayagoo caashaqsan wadaad Carab ah oo dalkiisa casiir ku cabaya!

Soomaalida iyo muslimiinta kaleba waxaa laga doonayaa in Kitaabka iyo Sunnaha u soo laabtaaan; cilmiga diintana ka bartaan culumada aan bugta ahayn ee shacabka aan ku baaranin sheekooyinka shirkiga ah sida qabuuro lagu alle baryo iyo wixii la mid ah. Soomaalida waa inay u istaagaan faafinta dacwada Islaamka si loogu baahiyo dhulka ilaahay oo dhan. Ciddii diida ama ka hortimaada dacwada Islaamka waa in lala galo jihaad la mid ah midkii lagu qaadey abuu Jahal oo kale. Kuwaas diiday dawcada, dhiigooda waa bannaanyahay, xoolahoodana waa xalaal, dumarkoodana waxay noqonayaan adoomo in loo galmoodo ay mubaax tahay, Wabillaahi Tawfiiq. “)

“Aad buu u mahadsanayahay wadaadka, haddana waxaan guda galeynaa doodihii iyo su’aalihii ka soo qayb galayaasha shirka.” Xandulle oo warqad dhinac ka jeexan gacanta bidix ku haysta ayaa sidaa yiri.

In cabaar oo doodo caato ah socdeen ka dib, Xandulle ayaa markale sheegay in la gaaray waqtigii la soo afjari lahaa doodaha. Wuxuu marti sharafta u sheegay in shirka soo xiri doonto Xaddiyo oo ah islaan si gaar ah looga xushmeeyo deegaanka iyo degamada uu shirka ka socdo.

“Ku soo dhowow Xaddiyo hadalka adigoo noo soo xiraya shirka” Sidaa waxaa yiri Xandulle oo codka ka sii xirmayo waayo wuxuu si xoog leh qalbiga uga dareemayaa xubiga xabiitiisa Xaddiyo!

“ Mahadsanid Xaaji Xandulle, maanta madashan wax macno iyo muunad leh lagama sheegin. Nimankii maanta oo dhan murmayay marnaba danta dadka Soomaaliyeed lagama maqal. Afartii nin ee qudbooyinka jeediyay waxay ka dhignaayeen Afar dhagax, Soomaaliduna Afartaas dhagax dhexdooda ayay ku dhamaadeen” Intaas ayuu hadalkii Xaddiyo ee shirka lagu soo xirayay ku koobnaa, waxayna dib ugu laabatay gasacaddii ay ku fadhisay ee Caana booraha laga dhamay waa hore .

Xandulle oo farxad laga dareemayo wajigiisa ayaa u soo dhaqaaqay dhankii ay fadhisay xabiitiisa Xaddiyo, wuxuuna asago geesaha iska eegaya si hoose u weydiiday “ Caawa waqtigee kuu imaadaa ?”

Xaddiyo ayaa kaga jawaabtay dalabkii Xaaji Xandulle “ Madaxa ayaa i xanuunaya, mana u maleeynayo in caawa iyo habeen danbe midna inaan kulmi doono. Waa inoo markale, ogowna adigaa ka taliyay madax xanuunkayga waayo waxaad igu marti qaadey Afar dhagax dhexdood!”

W/Q : Cabdullaahi M. Cawsey.
Email: sthinktank@gmail.com

Copyright 2015©Somali Think Tank , All rights reserved.